

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Maamulka Gobalka

Maamulka gobalka ee Kronoberg waxa xukuma xildhibaanada maamulka gobalka kuwaas oo ka kooban siyaasiyiin dadku soo doorteen.

Xildhibaanada Maamulka Gobalku waxa ay ka kooban yihiin 45 gudoomiye kuwaas oo ah gudiga ugu sareysa ee go'aamada maamulka gobalka gaadha. Waxa ay go'aamiyaan waxaqabadka maamulka marka sida ku saleysan xaalada caafimaadka ee gobalka, baahida dhinaca caafimaadka- iyo daryeelka bukaanka iyo awooda dhaqaalaha. Kulanadu waa ay u furan yihiin cid kast oo rabta in ay timaado oo ay dhageysato. Kulan kasta waxa la siiyaa fursad ay dadka gobalka ku nool ku waydiiyaan su'aal saameysa wax qabadka maamulka gobalka.

Gudiga Maamulka Gobalka, oo ka kooban 15 siyaasiyiin amaan-haye ah lana soo doorteyn, ayaa hogaamiya iskuna duba rida maamulka guud ee wax qabadka.

Talada muwaadinka

Dhamaan dadka reer Kronoberg ayaa lagu soo dhaweynayaa in ay soo dhiibtaan talo ku sabsan wax ka badalida iyo ka wanaajinta waxqabadka gudiga maamulka gobalka. Waa in aad ku saxeexdaa magacaaga iyadoo aad sheegayso cinwaankaaga iyo telefoon lambarkaaga. Ku qor wargad caadi ah ama adeegso foomka ku jira www.ltkronoberg.se ku lifaaqan qaybta "Internettjänster". Ku soo hagaaji:

Medborgarförslag
Landstinget Kronoberg
351 88 Växjö

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Wada hadalka muwaadiniinta

Xiliga 2010 waxa uu ku talo jiraa inuu bilaabo Maamulka Gobalku Kronoberg inuu bilaabo wada hadalka muwaadiniinta ka dhacaaya: www.ltkronoberg.se. Muwaadiniinta raba in ay ka qayb qaataan ayaa sameyn doona taas. Baadhitaan ku saleysan boga oo ka kooban dhowr

su'aalood oo qaybo la soo xulay ah ayaa dhowr jeer sanadkii emaylka laguugu soo diri doonaa. Jawaabta baadhitaanka ayaa laga sameyni warbixin loo soo koobay dibna loogu diri doonaa ka qayb qaateyaasha, siyaasiyiinta, masuuliyiinta iyadoo boga internetkana lagu daabici doono.



Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.